Maxaa ku dhacay dhaqaalaha reer Yurub, mise la badbaadin karaa?

W/q. Maxamed Dalmar

Desember 03, 2011

Sida lagala socdo warbaahinta, qaaradda Yurub waxaa soo foodsaaray dhibaatooyin dhaqaale oo halis galin kara midnimadeeda. Waxay dhibaato ka taagan tahay oo loo caalweysan yahay deynta xad-dhaafka ah oo dawladaha Yurub qaarkood qabaan, dawladahaasoo run ahaantii lagu sifeeyn karo kuwa kacay ama musallifay. Waxaa walwal laga qabaa in habka lacagta "EURO" uu kala daato sidii tusbax furtay. Waxaan iyana fiicnayn xaaladda bankiyada iyo seyladaha Yurub oo khalkhalay. Waxaa jagooyinkoodii waayey hoggaamiyayaal muddo talinayey. Waxaa hadda wadnaha farta loogu hayaa in haddii dhibaatada dhaqaale ee Yurub la maareyn kari waayo, inay u gudubto addunka intiisa kale illayn waa la isku wada xirxiran yahaye. Angela Merkel, "Chancellor"ka Xukuumadda Jarmalka oo dhawaan la hadleeysey xubnaha xisbigeeda Christian Democrats waxay dhibaatadaan dhaqaale ee Yurub ku tilmaantay imtixaankii ugu darnaa ee Yurub soo marto tan iyo dhammaadkii Dagaalkii labaad.

Su'aashu waxay ahayd: maxaa ku dhacay dhaqaalaha reer Yurub?. Intaanan ka jawaabin su'aashaas, bal horta aan in yar sharraxo siyaabaha dawladi u qaadan karto deyn awoodeeda ka sarreeysa, ka dibna u musallifi karto. Haddaba, deyntu asal ahaan waxay ka dhalataa kharashka dawladda oo ka bata dakhligeeda, dabadeedna sababa isdhin miisaaniyadeed "deficit". Isdhinkaas oo sanadba sanadka ka dambeeya isbiirsaday oo ballaartay ayaa ah deynta qaranka *" public debt*" ama "sovereign debt". Habka ay dawladi wax u amaahatana waa sidaan: waxay soo saaraysa ooy suuqa galinaysaa "ballanqaadyo maaliyadeed' (bonds ama boondis haddan soomaaliyeeyo). Ballanqaadyadaas waxaa iibsanaya bankiyada, sanaadiiqda kaydka hawlgabka "pension funds", shirkadaha caymiska iyo dadweynahaba. Boondisku waxay ku muddeeysan yihiin waqti go'an sida 10 sano ama 5 sano, waxaana saaran korsaar "*interes*t" oo isna xadidan oo ku xiran hadba kalsoonida lagu qabo dawladdaas, sida 5% ama 7%, iwm. Isla marahaantaas, waxaa jira suuq ballaaran oo gacan-labaadle ah (secondary market) oo u sahlaya ciddii haysata boondis inay iska gado iyadoo aan la gaarin waqtigii uu dhacayey (Ereyada iibsi iyo gadid sidaan ayaa u adeegsanayaa iibsi waa "buy" gadid waa "sell".

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Haddii dawladdaasi aynan xakameeyn kharashkeeda oo dabada u qabato boondiska sidii qof balwo ka adkaatay, mar uunbaa waxaa dhacaya wax dadka baraarujiya sida ascaarta guryaha oo dhacda, ama xog la qarin jirey oo la helo sida deynta Giriigga. Ka dib, waxaa abuurmaya shaki iyo kalsoonidarro. Dareenkaaas kalsoonidarrada ahina wuxuu gilgilayaa suuqa boondiska oo aad xasaasi u ah. Waxaa dhacaya qiimaha boondiska dawladdaas, waxaana kordhaya heerka korsaarka lagu dallaco. Ka dib, waxaa sii kordhaya isdhinkii (deficit) dawladdaas, waxaa sii siyaadeeysa kalsoonidarradii suuqa ilaa la gaaro heer aayan dawladdaasi suuqa ka heli karin xitaa lacag ay ku bixiso kharashka korsaarka. Waa marka la leeyahay dawladdaasi waxay gaartay heer "deeyn-bixin-waa" (default) oo qaylodhaan afka lagu dhufanayo si loo "qaan-furto" (bailout) dalwladdaas. Waa heerka ay hadda gaareen dawladaha Portugal, Ireland, Italy, Greece iyo Spain oo markii la isku daray xuruufaha hore ee magacyadooda loo bixiyeye "PIGS". Waa tilmaan heerka ay gaareen iyo dhiiqada ay ku jiraan.

Marka laga hadlayo sababaha keenay mashaakilka dhaqaale ee asiibay dawladaha Yurub, waxaa la xusi karaa saddex arrimood:

1. Sanooyinkii 1990 maadkii iyo blowgii qarnigaan ayay dawladaha qaarkood sameeyey dib-u-habeeyn dhaqaale oo ku wajahan furfur dhaqaale (free market) iyagoo jaray heerka canshuuraha, dhaqaalahana ka qaaday xakameeyntii iyo kormeerkii siiba bankiyada iyo hay'adaha maaliyadda..
2. lacag naqdi ah (liquidity) oo buux dhaafisay seyladaha maaliyadda adduunka oo hoos u ridday heerka korsaarka amaahda. Waxaa la qiyaasayaa in lacagtasi badi ka timid dawladda Shiinaha
3. Dawladaha qaarkood oo xubin ka noqday habka lacagta Euro oo helay kalsooni iyo awood wax amaahasho oo aayan lahayn meekhaankeedii.

Waxaan hoos ku soo qaadanayaa dawladahaas qaarkood tusaale ahaan. Dawlad kasta waxay leedahay duruufaheeda. Haseyeeshee waxaa saldhig u ah guuldarradooda deeyn xad-dhaaf ah ooy qaateen.

Ayslaand (Iceland)

Sida Soomaaliya loogu soo qaato tusaale dal ku fashilay siyaasadda iyo maamulka ayaa Iceland'na loogu soo qaata tusaale dal ku fashilay maaliyadda iyo lacagta. Iceland waa jasiirad yar ooy deggen yihiin 320,000 qof oo la oran karo waa hal reer. Waxay ahaayeen dad ladan, qunyar socod ah oo ku tiirsan kalluumeeysiga ilaa ay gashay hawada ah inay ka muuqdaan sayladaha maaliyadda adduunka iyagoo aan lahayn aqoonteeda iyo tabarteeda. Sanadkii 2000 waxay qaybta gaar ahaned ku wareejiyeen (privatization) saddexdii banki oo dawladdu lahayd. Saddexdii bankina waxay bilaabeen inay soo minguuriyeen tabihii lagu jabay ee Wall Street. Waxay ku dhaqaaqeen inay soo saaraan boondis oo lacag kaga amaahdaan bankiyada addunka. Waxay kaloo fureen xisaabo korsaar sare leh oo internetka ku shaqeeya (online banking) oo lacag badan kaga uruursadeen dadweeyne badi deggan Ingiriiska iyo Denmark. Waxaasoo lacag ah waxay

Copyright © 2011 WardheerNews.com

sii deeymiyeen, iyagooo aan u abbayeelin, cid kastooy arkaan ooy ku jiraan iyaga naftooda, xaasaskooda, saaxiibadooda iyo qaraabadooda. Ka dib waxay reer Iceland dhigeen lama arag iyo lama maqal. Waxay iibsadeen baabuur, diyaarado khaas ah, guryo labaad ama saddeexaad ooy ka iibsadeen London iyo Copenhagen, kooxo ciyaareed, shirkado ganacsi iyo bankiyo shisheeye ooyan la socon maamulkooda. Waxaa tusaale loo soo qaata, nin reer Iceland ah oo u dabbaldagayey sanadguurada dhalashadiisa oo Elton John diyaarad u soo kireeyey si uu uga heeso xafladdiisa isagoo ku khasiray munaasabaddas hal malyan oo doollar. Waxaan soo xusuustay nin burcadbadeed ah oo la yiri laba kooxood oo muusikada tuma ayuu Jabuuti ka soo kireeystay si ay arooskiisa uga tumaan.

Baadhigii reer Iceland ku jireen wuxuu dhammaaday sanadkii 2008. Waa markii ay dhaceen mashaakilkii dhaqaalaha Maraykanka oo adduunka saameeyey. Xilligaas waxaa Bankiyada Iceland lagu lahaa 100 bilyan oo doollar. Barbardhig waxsoosaarka guud ee dalka ee sanadka (GDP) oo ahaa 14 bilyan oo doollar. Waa kaaf iyo kala dheeri. Hal mar ayaa dalkii, dadkii iyo bankiyadii Iceland kaceen. Waxaa la xiray suuqa saamiyada Iceland, waxaa dhacay oo dhulka galay heerka sarrifka Koronka Iceland, waxaa cirka isku shareetray heerka korsaarka, waxaana istaagay waxsoossarkii. Haseyeeshe, Iceland waxay qaaday tillaabo ayan qaadin dawladaha kale iyadoo ku gacan seertay Hay'ada Caalamiga ah oo diiday inay damiinato bankiyada ooy la wareegto qaantooda. Haddii si kale loo dhigo, faraha ayey ka qaaday ha kaceene/qarxeene. Taa micnaheedu waxaa weeye , waxaa khasaaraya bankiyadii Yurub oo markii hore wax amaahiyey bankiyada Iceland. Waxay kaloo diideen inay magdhowaan dadkii lacagta ku lahaa oo u badnaa reer Britain. Arrintooda waxaa moodaa inay ahayd waxba dhawran maynee dhagaxyo soo daadsha.

Ayrlaand (Ireland)

Sida Iceland, Ireland'na waxaa la degey bankiyadeeda. Waa isla qisadii. Bankiyo boondis ku amahday xoolo aan xisaab lahayn, ka dibna si maanla'aan u faraqay diyuun. Waxay ku kala duwan yihiin oo keliya, bankiyada Ireland waxay si taxadar la'aan ah u maalgeliyeen dhismayaaal sida guryo, xafiisyo, moolal, hudheelo iwm. Waxaa iyana ceebtoodii soo baxday markii mashaakilkii dhaqaalaha ee 2008 soo ifbaxeen oo qiimihii guryahu dhaceen. Ilaa iyo in ku dhow 180,000 oo guri oo dhismayaashoodu heerar kala duwan marayeen ayaa laga cararay, bankiyaduna waxay khasaareen in ka badan 100 bilyan Euro. Waxaa yaab leh, dawladda Ireland oo damiinatay bankiyada, lana wareegtay qaamahooda oo dhan 400 bilyan Euro. Waa yaab, qoolkii bankiyadu ku jireen ayaa dawladda Ireland is galisay. Waana sababta hadda dawladda Ireland u musallifiyey ooy u baahatay barnaamij qaan-furasho ah (bail out), ayna gacanta ugu hoorsatay beesha Yurub iyo Hay'adda Lacagta adduunka (IMF). Waxaa xusid mudan in barnaamijyada "qaan furashadu wataan shuruudo adag oo gunti dhuujis ah (austerity) oo isgu biyashubanaya canshuurta oo la kordhiyo iyo kharashka oo la jaro ooy ku jiraan barnaamijyada gargaarka bulshada.

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Giriigga

Dawladda Giriiggu in muddo ahba waxay ku nooleyd nolol ka sareeysa awoodeeda iyo agabkeeda. Waxaana fasahaadiyey oo kabo aayan lahayn u gashay xubinnimada Aagga Lacagta ee Euro "Euro Zone". Giriigga waxaa loo oggolaaday inay ka mid noqoto Aaggaas sanadkii 2001, inkastoo hadda la isweeydiinayo sida loogu oggolaaday waayo waxay ka beenshegtay xisaabaadkeeda. Xubinnimada Euro waxay Dawladda Giriigga u furtay irridaha suuqyada maaliyadda iyo lacagta, iyaduna si xad-dhaaf ah oo ku talaxtag ah ayey u isticmaashay si ay u daboosho kharashyadeeda tirada badan. 12kii sano ee ugu dambeeyey, dawladda Giriiggu waxay labanlaabtay mushaharaadka shaqaalaha, waxay kordhisey lacagaha hawlgabka, waxay martigelisay ciyaaraha "Olympic'ka oo kharash badani ku baxay iyo waxeeroo kalo oo kharashyo ah oo aan xitaa tirakoobkooda la sixi karin. Waxaa tusaale loo soo qaadan karaa Wakaaladda Tareenka (National Railroad) oo dakhligeedoo dhammi yahay 300 malyan Euro sandkii, karashkeeduna gaaro ilaa 700 milyan Euro. Dabcan, farqiga (400 milyan Euro) waxay sanad waliba ku dabooshaa deyn. Keligeedna ma ahee, waxaa sidaas la mid ah hay'adaha kale ee dawladda oo deyn-ku-nool ah. Dhanka dakhliga, canshuuraha lama soo xereeyo ee waa la musuqmaasuqa. Canshuuraha keliya oo si dhab ah loo soo xereeyo waa canshuuraha laga gooyo mushaharka shaqaalaha oo aan lala dhuuman karin. Inta kale waa lala fikadaa iyadoo la adeegsanyo xeelado kala duwan. Sida la yiri, dadka reer

Shaqaalaha Giriigga oo diidan barnaamijka Gunti-dhuujiska dhaqaale. AFP news

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Giriiggu dhaqan iyo caado uma leh inay bixiyaan canshuuraha oo intay ka gaban karaan waa ka gabbadaan (waxaa moodaa inaan dhankaas qaraabo ka nahay).

In dawladda Giriiggu kacday (bankrupt) waxaa la ogaaday sanadkii 2009 markii la doortay xukuumad cusub oo Giriig ah, taasoo daboolka ka qaaday xaaladda dhabta ah ee miisaaniyadda Giriigga. Waxaa la ogaaday, baaritaan ka dib, in isdhinka miisaaniyaddu gaarayo 13.6% ee waxsoosaarka guud ee dalka ee sanadka (GDP) ee uusan ahayn 3.7% ee GDP sidii horey ay dawladda Giriiggu u faafisay. Waxaa lala fajacay xaddiga deynta dawladda Giriigga oo dhan 340 bilyan Euro oo u dhiganta $485 bilyan iyo weliba sida aayan u awoodi karin inay guddo qaan intaa le'eg. Waxaa isla markiiba dhiillo gashay suuqa boondiska. Suuqa boondiska ayaa dawladaha deeynta cunsiiya hadhowna cunaha qabta. Waxaa durbadiiba dhacay qiimaha boondiska dawladda Giriigga oo loo aqoonsaday "junk bonds". Waa boondis qiimo-laawayaal ah oo qofkii iibsadaa uu u bareeray khasaaro. Waxaa xigtay dadaal ay hoggaaminayeen dawladaha Jarmalka iyo Fransiiska si loo samata bixiyo ama loo qaan-furto dawladda Giriigga. Muran iyo wada xaajood ka dib, waxaa bishii may 2010 dawladda Giriigga loo abaabulay qorshe "qaan-furasho" ah ooy maalgeliyeen Hay'adda Lacagta Adduunka IMF, Beesha Yurub iyo Bankiga Dhexe ee Yurub, waxaana la siiyey lacag dhan $146 malyan. Haseyeeshe, waxaa kaalmadaas lagu xiray, sidii caadada ahayd, shuruudo aad u adag ooy ka mid yihiin in kharashka dawladda si aad ah loo dhimo iyo in iyana canshuuraha si aad ah loo kordhiyo, loona soo xereeyo. Arrintaas waxaa ka soo horjeestay shaqaalaha Giriigga oo dhigay mudaaharadyo rabsho wata ooy dad ku dhinteen. Dhanka kale, shacbiga Jarmalka ayaa iyana ka biyodiiday in lacagtooda lagu qaan-furto dawladda iyo dadka Giriigga ooy ku tilmaameen mashaqeeystayaal.

Aan in yar ka iraahdo qorshayaasha "qaan-furashada" (bailout). Wax qaan ah oo la iska furanayo ama la isu deynayo ma jirto. Waxa la isku haystaa waa yaa bixinayaa khasaarihii meesha ka dhacay, waa lacagtii la khasiray. Ma waxaa bixinaya bankiyada waaweeyn ee Jarmalka iyo Faransisika oo markii horeba amaahda iska faraqay (waa haddii la dafiro deeynta), mise dadweeynaha Giriigga (waa haddii qorshe qaan-furasho oo " gunti-dhuujis" weheliyo la sameeyo), mise waa la khasaara-qaybsanayaa oo waxaa wax ka bixinaya kharashka dadweeynaha Jarmalka iyo dawladaha waaweeyn (waa haddii Giriigga deeynta qaar laga cafiyo)? Waxaa moodaa in culayska la saaray "gunti-dhuujiska" oo dhaqaalaha sii dhaawacay. Si kastaba ha ahaatee, reer Giriig waxaa haysta laba daran mid dooro. Haddii la yiraahdo deeynta bixiyana waxaa sugaya barnaamij "gunti-dhuujis" ah oo xanuun badan oo muddo socanaya oo aan la xamili karin; hadday dafirannaa waxay gelayaan jahawareer iyo fawdo dhaqaale, sababtoo ah dadka reer Giriiggu waxay xisaabaadkooda iyo hantidooda ku haystaan lacagta Euro, mana oggolaanayaan inay qaataan Drachma oo ah lacagta Giriigga oo beddeli doonta Euro'ha oo la ogyahay inayan qiime yeelan doonin. Waxaa laga cabsanayaa in dadku weeraraan bankiyada si ay ugala baxaan hantidooda, dabadeedna bankiyadu kacaan.

Waxaa arrinta Giriigga sii cusleynaya xubinimada Giriigga ee Aagga lacagta Euro. Waxaa laga cabsanayaa in haddii dawaldda Giriiggu kacdo inay iyana kacayaan dawlada

Copyright © 2011 WardheerNews.com

kale ee la midka ah sida Portugal, Ireland, Spain iwm. Haddii kuwaasi kacaanna waxaa kacaya bankiyada Jarmalka iyo Faransisika, iwm oo lacagta amaahiyey. Haddii kuwaasi kacaanna waxaa Kacaya dawladaha waaweeyn sida Faransiiska iyo Jarmalka, haddii kuwaasi kacaanna waxay dibaatadu gaareeysaa adduunko idil sida Shiinaha iyo Maraykanka. Waxaa silsilad isku xiran oo haddii midi go'do kuwa kalena raacayaan.

Waxaa la soo gaaray Oktoobar 2011, xaaladdii deynta dawladda giriiggu waa ka sii dartay. Lacagtii hore oo la siiyey wax waa tari weydey. dhaqaalihii iyo maciishaddii waa sii xumaadeen. Waxaa lagu eedeeynayaa madaxda Yurub inayan waqtigii la rabay iyo sidii la rabay wax uga qaban dhibaatada deeynta Giriigga. Waxaa abuurantay xaalad deg deg ah intay cagajiidayeen. Suuqii boondiska, oo dawladaha deynta cunsiin jirey, hadhowna ka matajin jirey, wuxuu imminka diiradda saaray dawladda Talyaaniga oo korsaarkeedi kor u qaaday. Talyaanigu waa dawladda saddexaad ee Yurub markii la fiiriyo xaddiga dhaqaalaheeda ama dawladda sideedaad markii la fiiriyo adduunweynaha. Waa la maleyn karaa hogga iyo ba'a ka dhalan kara dawladda Talyaanigu oo kacda (musallifto). Waa warey ayaa yeertay. Shir deg deg ah ayey isugu yimaadeen madaxda Aagga Euro, waxayna go'aansaday saddex qodob:

1. In dawladda Giriigga 50% deeynta laga cafiyo. Danta ayaa khasabtay in runta loo soo noqday oo ah inaan dawladda Giriiggu, haba yaraatee, awood dhaqaale ooy wax ku bixiso lahayn, ama guntiiga ha lagu dhuujiyo ama yaan lagu dhuujin.
2. In la kordhiyo raasumaalka bankiyada si looga badbaadiyo musallif. Maadaama deynta qaar laga cafinayo dawladda Giriigga, waxaa lagama maarmaan noqotay in bankiyadii amaahda bixiyey la xoojiyo raasumaalkooda si ayan iyana u kicin.
3. In la kordhiyo Sanduuqa Kaydka Yurub ee Xasilinta Maaliyadda oo la gaarsiiyo ilaa 1 tirilyan Euro. Waa sanduuqa laga taakuleeynayo dawladaha tabaaleeysan.

Heshiiskii ka dib, qalaanqal ayaa suuqa galay markii ra'iisul wasaarihii hore ee Giriigga Geoge Papendreau refrendum ku dhawaaqay, waxaana halkaas jagooyionkoodii ku lumiyey labadii ra'iisul wasaare ee Giriigga iyo Talyaaniga.

Musqbalka Euro

Lacagta Euro waxaa ku dhaqma 17 dal oo ka mid ah 27 dal ee ku bahoobay midowga Yurub. Waxaa kaloo ku isticmaala 5 dal oo Yurub ah oo yar yar. Waxaa kaloo ku xiran lacagtaas 20 dal oo 14 ka mid ahi ka tirsan yihiin qaaradda Afrika. Lacagta Euro waa lacagta ugu wareeg badan (circulation) adduunka , waana tan labaad oo adduunka kayd ahaan loo haysto "reserve" markii laga soo tago doollarka Maraykanka. Lacagta Euro waxaa markeedii hore la soo saaray sanadkii 1999 iyadoo ah xisaabaad banki oo keliya. Saddex sano ka dib, 2002 waxaa suuqa la geliyey iyadoo xaashi iyo qadaadiic ah.

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Angela Merker iyo Nikolay sarkozy

Euro'ha dhibaatada maanta haysta waxay la xiriirta cillad farsamo oo ka socota qaabkii loo dhisay. Waxaa halkaan yaalla 17 dawladood oo leh 17 dhaqaale oo aan isu-dheelli tirnayn, isuna dhigmin oo haddana wadaaga hal lacag laakiinse aan wadaagin hal siyaasad miisaaniyadeed (fiscal policy). Waxaa maqan shaqadii laba hay'adood oo tiirrar u noqon lahaa dhismaha lacagta Euro. Waxaa maqan miisaaniyad dhexe ama khasnad dhexe oo markiii loo baahdo laga taakuleeyo dawladdii ay soo foodsaarto dhibaato dhaqaale. Waxaa kaloo maqan shaqadii bankiga dhexe oo hawshiisu tahay inuu badbaadiyo bankiyada kale markii xaalku xumaato. Waa jira banki dhexe ee Yurub "European Central Bank", haseyeeshee xeerkiisa ayaan u oggolayn inuu amaah siiyo dawladaha xubnaha ah, wxaana qodobkaas ku dhagan dawladda Jarmalka.

17ka dawladood oo ku ku jira Aagga Euro waxay ka tanaasuleen lacagahoodii qaran. Haddii dawladi ka tanaasushana lacagteeda qaran waxay dhuminaysaa alaado dhqaale ooy adeegsan lahayn markii dhaqaalaheedu dheeliyo oo toosin u baahdo. Waxaa ka mid ah aaladahaas sarrifka lacagta. Bil matal waxay hoos u dhigi kartaa heerka sarrifka lacagta (devaluation) iyadoo uga dan leh in ascaarta badeecadaheedu raqiisaan markii loo beddelo lacagaha qalaad, ka dibna waxdhoofinteedu badato, waxkeeniddeedu (imports) yaraato, dalxiisku kordho, dhaqaaluhuna sidaas ku soo kabto. Waxay kaloo dawladdaasi awoodaa inay daabacato lacagteeda oo amaahiso bankyadeeda tabaaleeysan. Waxay kaloo dib u iibsan kartaa boondiskeeda si ay suuqa u xasiliso. Labadaas alaadoodba waa laga qaaday dawladaha ku jira Aagga Euro wax u beddelana lama samayn. Waa halkaas meesha sartu ka quruntay.

Ma dhici doonaa Euro'hu? Aalaaba lama saadlin karo arrimaha dhaqaalaha, haseyeeshe waxaa hubaal ah inuusan hadda caga badan ku taagneyn, halisna u yahay inuu qarxi karo mar kasta laga bilaabo sacaddaan. Wargeeyska caanka ah ee Economist wuxuu ka digay

Copyright © 2011 WardheerNews.com

in Euro'hu ku qarxi doono toddobaad gudihiis haddayan madaxda Yurub qaadin tillaabooyin cad cad oo geesinimo leh. Sidee haddaba loo badbaadin karaa Euro'ha?

Dadka ka ka faallooda arrimahaan waxay badidoodu isku raaceen saddexaan qodob:

Hor iyo horraan waxaa loo baahan yahay in Bankiga Dhexe ee Yurub (B.Dh.Y) uu buuxiyo kaalintii lagu yiqiin banki dhexe oo ah inuu lacag daabaco. Haa, inuu lacag daabaco oo weliba mid aad u tiro badan oo gaareeysa 1 ilaa 2 tirilyan Euro daabaco. Lacagtaas wuxuu ku maalgelinaya bankiyada ganacsiga Yurub oo qarka u saaran inay kacaan. Waxaa lagu matilay xaaladda Yurub sidii guri gubanaya oo u baahan in biyo badan lagu shubo si loo bakhtiiyo dabka. Biyihiina waxaa ka dhigan lacagta B.Dh.Y uu soo saarayo si uu u xasiliyo suuqa boondiska. Hindisahaani wuxuu ku fiican yahay si dhakhso ah ayaa loo hirgelin karaa.

Tan labaad, waxaa la soo jeediyey in la sameeyo boondis ay wadar ahaan u soo saaraan una damaanad qaadaan 17ka dawladood ee ku jira Aagga Euro. Hadda dawlad waliba waxay soo saartaa boondiskeeda. Dawladaha qaarkood sida Giriigga, Ireland, spain, Italy iwm. waxaa ka xirmay suuqa ka dab markay lumiyeen kalsoonidii. Haddii la soo saaro boondis ka dhexeeya dawladaha oo dhan saqiir iyo kabiirba, waxaa soo noqonaya kalsoonidii iyo xasiloonidii suuqa boondika. Hindisahaani wuxuu u horseedayaa in dawladaha Aagga Euro mideeyaan maaliyaddooda.

Ugu dambeeyntii, waxaa la leeyahay sida keliya ooy ku badbaadi karaan dawladaha Aagga Euro waa iyagoo mideeya siyaasaddooda maaliyadeed iyo miisaaniyadeed (fiscal union) oo yeesha hal khasnad iyo hal wasaarad maaliyadeed, yacni sidii dawlad federal ah u shaqeeya. Way adag tahay in la meelmariyo hindisahaas, waxayna qaadaneeysa waqti dheer iyo in wax badan laga beddelo xeerka Euro'ha, waxaase la filaya in baaxadda khatarta ku soo fool leh Yurub ay u bisleeyn doonto madaxda Yurub inay qaadaan tillaabo sidaan u qotodheer.

Hadda waqtigaan aan qorayo maqaalkaan waxaa fadhiya wasaaradaha maaliyadda ee Aagga Euro. Hadday ku guuldarreystaan inay deg deg u gaaraan go'aanno wax-ku-ool ah oo xal u noqon kara dhibaatada taagan, waxaa hubaal ah in lacagta Euro'hu dhici doonto. Saadaashu waxay u badan tahay in Aagga Euro'hu u kala jabi doono laba kooxood. Koox yar oo xudunta ku taal ooy ka mid yihiin Jarmalka, Austria, Holland oo gooni u qaadan doona Euro'ha iyo koox dacallada ka laalaadda sida Giriigga, Spain, Portugal, Italy iwm. oo la oran doono dabyarow durug. Si kastaba ha ahaatee, waxaa la aamminsan yahay in burburka Euro'hu sababi doono dhulgariir maaliyadeed oo geeysta khasaare aan la koobi karin oo adduunkoo idil gaara oo finfiniinkiisa laga dareemi doono ilaa Soomaaliya. Midowga Yurub waa meesha gargaarka ugu badani uga yimaado Soomaaliya.

Madaxda Yurub waxaa lagu tirinayaa inay yihiin dad waayo-arag ah, macquul ah, xilkas ah, oo aan marnaba ogoolaan doonin in taladu farahooda ka baxdo. Waxaa la sugayaa inay ku mintidi doonaan midnamada Yurb ee lixdanka sano la soo yagleelayey.

Copyright © 2011 WardheerNews.com

Bal aan aragno siday ku dambeeyso.

Maxamed Dalmar
Email::mdalmar@sympatico.ca

Maxamed Dalmar waxa uu xilal kala duwan ka soo qabtay Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, isaga oo ahaa Agaasimaha Guud ee Bangiga Dhexe, islamarkaana barre ka ahaa kuliyadii Dhaqaalaha ee Jaamacada Soomaaliyeed.

Xigasho

- Lewis, Michael. Boomerang: Travels in the New Third World. New York:W.W. Northon & Company Ltd., 2011
- Reynolds, John Lawrence. Bubbles, bankers & bailouts. Vancouver: Douglas & McIntyre
- The Eurozone: Is this really the End. The Economist: November 26, 2011
- Krugman, Paul. Can Europe Be Saved. New York Times: January 12, 2011
- Bake, Luke. Scenarios: Radical Solutions to the Euro Zone Crisis. Reuters. December 1, 2010.
- Munchau, Wolfang. The Eurozone really has only days to avoid collapse. Financial Times. November 27, 2011
- Scalfari, Eugenio. Due Mario italiani per salvare l''Euro. La Repubblica. 27 Novembre 2011.

Copyright © 2011 WardheerNews.com